

FAAFINTA

RASMIGA

الرسمية



الجريدة

DAWLAD PUNTLAND EE SOOMALIA
لولاية أرض بونت الصومال

Sanadka 17.5-aad. Garowe 08 August, 2015

Lam.8

Faafinta bil walba soo baxda

جريدة الشهرية

Qaybt Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawladda Puntland

Qiimuhu waa Sh.So 10,000 rukun walba . Sanadkii waa Sh.So 170,000 dalka gudihiisa, dalka dibaddiisa Sh.So 500,000 rukunka la waydiisto, waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilawdaa 1-da January. Qiimaha qoritaan F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So 3,000, rukunka iyo qoritaanka waxaa la waydiistaa qeybta maamulka Faafinta rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha barriga ee wasaaradda maaliyadda.

TUSMADA

Qaybta Koowaad

Ansixinta Xeerka khidmada shaqaalaha ajaanibta ah

Qaybta labaad

Xeer

Waxba ma leh

Qeybta Saddexaad

Talooyin, Isgaarsiin, Ogaysiis, Iidheh IWM.

Waxba ma leh

Sharci Lr 11. ee 08/08/2015, kuna saabsan Ansixinta Xeerka khidmada shaqaalaha ajaanibta ah



PUNTLAND STATE OF SOMALIA

**Sharci Lr. 11 ee August 08, 2015, kuna saabsan ansixinta Xeerka
khidmada shaqaalaha ajaanibta ah.**

Madaxweynaha Dawladda Puntland

Markuu arkay: Dastuurka Dawladda Puntland qodobkiisa 80-aad;

Markuu arkay: Ansixinta Golaha Wakiilada Puntland ee Summad
XGGW/DPLS/53/2015 ee 30/07/2015;

Markuu tixgeliyey: Muhiimadda xeerkani u leeyahay Dawladda Puntland.

Wuxuu soo saaray

Xeerkan soo socda:

Qodobka 1-aad


Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen Xeerka khidmada shaqaalaha
ajaanibta ah

Qodobka 2-aad

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala keydinayaa Xafiiska
Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska
Garyaqaanka Guud ee DPL.

Qodobka 3-aad

Dhaqangalka xeerkani wuxuu noqonayaa marka Madaxweynuhu saxiixo
laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dawladda Puntland.


Dr. Cabdiweli Maxamed Cali Gaas
Madaxweynaha Dawladda Puntland

DAWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA



ولاية بونت لاند الصومال

GOLAHA WAKIILADA

مجلس النواب

Xafiiska Guddoomiyaha
Office of the Speaker

Ref:- XGGW/DPL/ 53 /2015

Garoowe

Taariikh:- 30/07/2015

Ku:- Madaxweynaha DPL

Garoowe

Ujeedo:- Ansixin khidmada Shaqaalaha Ajaanibta ah

Guddoomiyaha Golaha Wakiilladdu:-

MARKUU ARKAY:-

Dastuurka DPL Qodobkiisa 64-aad

MARKUU ARKAY:-

Soo gudbinta Madaxweynaha Ref
MW/DPS/94/2015 ee Jan **31/2015** kuna
saabsan Khidmada Shaqaalaha Ajaanibta ah

MARKUU TIXGELIYEY:-

Baahida loo qabo Ansixinta Khidmadda
Shaqaalaha Ajaanibta ah, si kor loogu qaado
dakhliga dawlada.

MARKUU DHEGAYSTAY:-

Dooddii iyo Go'aankii Golaha Wakiillada ee
kalfadhiga 35-aad, fadhigiisa 26-aad ee
30/07/2015 ku ansixiyey Khidmadda
Shaqaalaha Ajaanibta ah

WUXUU GUDDOOMIYEY:-

Ansixinta Khidmada Shaqaalaha Ajaanibta ah ee halkan ku lifaaqan


GUUL EEBBE

Md. Siciid Xasan Shirre

Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL

Tell:- +252 90 7796136 am +252 90 7798430

Email: gud.baarlaman.pl@gmail.com parliamentspeaker@gmail.com, puntlandparliament@gmail.com



LIFAAQ

Khidmada Shaqaalaha Ajaanibta ah

No	Tilmaan	Khidmadda Sannadkii
1	Shaqaalaha u shaqeeya hay'adaha caalamiga ah iyo kuwa gaarka loo leeyahay	\$ 600 sannadkii
2	Macallimiinta Ajaanibta ah ee waddanka barayaasha ka ah	\$ 200 Sannadkii
3	Dhakhaatiirta iyo hawlwadeennada caafimaadka ajaanibta ah	\$ 400 Sannadkii
4	Shaqaalaha ka hawlgala shirkadaha dhismayaasha	\$ 400 Sannadkii
5	Ciddii kale oo intaas ka soo harta oo gaar loo keensado	\$ 400 Sannadkii

- Khidmadahan waxaa loo kala qaadayaa laba qeybood sannadle iyo lix biloodle, lix bilood waxaa laga qaadayaa wixii sannad ka yar
- Laga bilaabo ansixinta Golaha Wakiillada ee 30/07/2015, khidmaddan waxaa qaadaysa Wasaaradda Maaliyadda DPL



